



Robert McKean
Interim Superintendent

PORTLAND PUBLIC SCHOOLS
Office of the Superintendent
501 North Dixon Street • Portland, OR 97227
(503) 916-3200 • superintendent@pps.net

Bulshada Dugsiyada Dadweynaha Portland ee Qaaliga ah,

Waxaan ka warqabaa in qoysas iyo arday fara badan ay ka cabsanayaan jawiga siyaasadeed ee waqtigan kaasi oo kor u qaaday cabsida ay ka qabaan xeerkan Madaxweyne. Marka aad fiiriso ficiiladii ugu dambeeyey, waa in aan dhammaanteen ka dareen qaadanaa iyada oo aan caawineyno kuwa bulshadeena ka midka ah ee aan garaneyn waxa ay rajadoodu ku dambeyn doonto, gaar ahaan bulshooyinka ay ka mid yihiin soo galeytiga(qaxootiga) iyo bulshooyinka muslimka ah.

Waxaan jecelahay inaan idiin xaqijiyo in ay ka go'an tahay Dugsiyada Dadweynaha Portland inay dhammaan ardeydeena u abuuraan jawi nabadjelyo, shaqaalaheenu iyo qoysaskuba ay qeyb ka yihiin, taasi oo ah karaamayada asalka oo marnaba noqon doonin mid aan cidlo kaga tegno.

Waa in aan wada jir isku gaashaanaa iyadoo Dugsiyada Dadweynaha Portland ay mar labaad idiin xaqijinayaan inay yihiin goob dhammaan soo dhaweysa, u dabaaldegta kala duwanaanshaha oo isla markaana ah meel arday, qoys iyo shaqaale waliba ku nabadjelyo oo iridayada ka soo gala.

Golaha Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland waxay amar ku siiyeen shaqaaluhu in ay cadeeyaan nimaadyada degmada ee la xiriira Waaxda Socdaalka iyo Fulinta Kastamyada Maraykan(ICE) hawlaha Iskuulada Dugsiyada Dadweynaha iyadoo ay shaqadaasi ay soo gabogabeynayaan. Shaqaaluhu waxay u soo bandhigi doonaan Golaha Waxbarashada bisha soo socota iyo guud ahaan degmada oo dhan tababar ay siinayaan shaqaalaha oo ay ku hubinayaan in siyaasadayada iyo dhaqankayaguba uu la jaanqadayo waxyaabaha naga go'an si aan u ilaalinayo dareenka iyo nolosha dhammaan ardeydayada iskuulada wax ka barata. Wuxaan sidoo kale qoysaskayaga siin doon maclumaadkani.

Waad ku mahadsan tiihin kaalmooyinkiina aad ku abuureysaan bulsho adag oo laga wada mid yahay taasi oo caawisa dhammaan ardeydeena.

A handwritten signature in black ink that reads "Bob" followed by a more stylized, cursive "McKean".

Bob McLean
Guddoomiyaha Waxbarashada Dugsiyada Dadweynaha Portland